



**Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska
ee Waaxda Booliiska Minneapolis**

Number:
7-1000

Mujalladda 7aad – Hawlgallada goobta

Dadka Naafada ah oo Aqoonta Luqaddooda Ingiriisiga ay Xaddidantahay

**7-1002.01 Xirid ama Xarigga ama haynta qofka naafada ah xagga isgaarsiinta ah
(05/06/15)**

(A)

Minn. Stat. 611.32 subd.2 wuxuu u baahan yahay in ay hay'adaha fulinta sharciggu si degdeg ah isula xiriiraan si ay u helaan turjubaan aqoon leh mar kasta oo lala macaamilayo qofka naafada ah ee la qabto ama loo xiro dembi. Qofka la xiray waxa uu xaq u leeyahay turjubaan si uu ugu sharraxo dhammaan eedaha lagu soo ogey qofka iyo inuu u sharraxo dhammaan hababka la xiriirra xiritaanka qofka iyo sii dayntiisa. Turjubaanka ayaa sidoo kale kaa caawin doona macaamil kasta oo kale oo lagama maarmaan ah (qabanqaabada daryeelka caafimaadka, iwm.).

Marka la xirayyo qof dhegoole ah ama maqalka adag oo ku hadlaya luqadda dhegoolaha, sarkaalku waa inuu isla markiiba tixraaca Hagaha LEP-da ee ku yaal MPD Net ee hoos yimaada Buug-gacmeedyada iyo Hagayaasha/Tusayaasha Adeeg bixiyayaasha qandaraaska leh ee u gaarka ah Magaalada oo la diyaariyo turjubaanka luqadda dhegoolaha si uu ugu turjumo maxbuuska laga soo qabtay goobta lagu hayo. Marka ay yimaadaan goobta lagu haynayo, shaqaalaha xarunta xabsiga waa in lagu wargeliyaa in qofku uu yahay dhegoole ama maqal adag yahay iyo in uu yimaado turjubaanka luqadda dhegoolaha si uu ula xiriiro qofka la xiray. Ogeysiintaan waa in lagu qoraa warbixinta xiritaanka. Saraakiishu ma'ahan inay ku sugaan turjubaanka in uu xarunta lagu hayo maxbuuska, si kastaba ha ahaatee waa inay codsadaan in la ogeysiiyo marka turjubaanku yimaado. (02/08/96) (05/06/15)